

Ku soo dhawaw Rugta Baxnaaninta Knoppaliden

Knoppaliden waa waax baaritaan- iyo daweyn. Waxaan annagoo isku dhafan oo leh xirfado kala duwan ka shaqeynaa inaan si waafaqsan soo gudbinta wax ugu kuur galno, una daweyno habeen iyo maalinba.

Knoppaliden waxay waalidka/kaaliyaha qofka la socda ku casuumeysaa quraac iyo fiiko fiidkii ah. Quraacda iyo fiikada fiidkii waxay ka koobanyihiin qaxwo/shaah iyo ismaris leh wax la saarto.

Waa la oggolyahay in cunto loo soo qaato halkan. Waxaa jira qol loogu tala galay in ay fadhiistaan waaliddiinta/kaaliyayaashu, oo ay wax ku cunaan. Waxaan heynaa qaboojiye/tallaajad iyo mikro. Ma jirto fursad loo heli karo shoolad qofka u gaar ah.

Sida asalka ahi waa in hal waalid/kaaliye uu la seexan karo bukaanka.

Iyadoo ay ugu wacanyihiin waajibka sir qarinta iyo ixtiraamidda bukaannada kale waxaa waaliddiinta loo tilmaamayaa qolka waaliddiinta, halkaas oo wax lagu cuno, lagu daawado TV, si degganna loogu qaabilo booqadayaasha.

Go' sariir iyo shukumaanno loogu tala galay waaliddiinta iyo bukaanadu waa ay yaallaan Knoppaliden.

Liiska hubinta ee bukaanka:

Dhar calaameysan oo aan xasaasiyad kicineyn oo lagu heysan karo gudaha iyo dibadda inta meesha la joogo oo dhan (ma jirto fursad lagu dhaqi karo). Walxaha nadaafadda sida kareemka qubeyska, shaambo, caday iyo daawo caday.

Bukaanka waxyaabihiisa loo kaashado. Oo ay ku jraan sawirrada lagula xiriir.

Nafaqada soondada lagu siiyo/cabitaannada nafaqada/budada tamarta ee uu taqtarku u qoray bukaanka waa loo soo qaadayaa. Bukaanka dawooyinkiisa ku soo qaada baakadahooda asalka ah.

Waxaan dadka siinnaa xafaayado heerkoodu caadi yahay.

Ka fikir xasaasiyadaheenna oo ha isticmaalin barafuunno iyo waxyaabo aad u carfaya! Looska nuucyadiisa kala duwanna waa ka mamnuuc halkan, haddii uu noqon lahaa mid gooniidiisa ah ama mid wax kale ku dhex jira, sida xalwo ama macmacaan.

Meel gawaarida la dhigto waa ay ku taallaa Knoppaliden dibaddeeda. Gaari ha dhigin meesha wiishashka laga soo raaco. Gaadiidka uu bukaanku ku imaanayo Knoppaliden waxaa dalbaya waaliddiinta naftirkooda.

Maxaddada tareenka waxaa laga soo qaadan karaa bas nambar 4, uga dega Däldernas kapell agteeda.

Taleefannada gacanta waa laga oggolyahay Knoppaliden. Waxaa taleefanka lagula dhex hadli kartaa bukaanka qolkiisa.

WiFi waa la heli karaa. Lama oggola in filin laga duubo ama sawirro laga qaado bukaanada kale ama shaqaalaha. Aagga oo dhan waa mamnuuc in sigaar lagu cabbo. Mamnuuciddu xitaa waa ay khuseysaa meesha gawaarida la dhigto.

Fadlan waa inaad timaaddaan Knoppaliden 30 ka hor inta aan la billaabin diiwaan gelinta.

Salaan ka socoto shaqaalaha Knoppaliden

Adareeska: Knoppaliden 3, 549 47 Skövde
Tel: 0500 – 44 38 20